

Mashruuca U Doodista ee Koonfurta England waxaa hay'add samofal ahaan loo sameeyay 2000 si ay u sii kobciso una maamusho adeegyo u doodisood oo la waday ilaa 1994.

SEAP waxay sumcad ku yeelatay fidinta adeeg tayadiisu sarayso oo ah u doodis heer sare ah; riixid isbadal iyo xujaynta fikirka heer degaan iyo qaran si loo xaqiijiyo in awoodaynta iyo hawsha laysliska qofka ku salaysan uu u noqdo mid dhab ah kaas oo is badal ku samaynaya noloshada dadka adeega hadal.

Ujeedada ururku waa inuu xaqiijiyo in aragtiyaha, rabitaanka iyo dareenka dadka isticmaalaya adeega daryeelka bulshada iyo caafimaadka kor loogu qaado adeeg bixiyayaasha; iyo si loo siiyo taageero u doodis shaqsiyaadka iyo kooxaha jecel inay xaliyaan arimo khaas ah. Ujeedadan guud ahaan waxaa loo marayaa laba hab:

- U doodayaashu waxay taageero, macluumaad iyo matalis ka siinayaan macaamiisha dhinacyada la xidhiidha dhibaatooyinka, tabashadda, ama cabashooyinka.
- Ururku wuxuu si toos ah ula shaqeeyaa adeeg bixiyayaasha ee heer degmo iyo heer qaran, iyaddoo ujeedadoodu tahay inay xaqiijiyaan in waayo aragnimada macmiilku tahay udub dhexaadka qorshaynta adeega, fulinta iyo kormeerida.

Mashaariicda SEAP waxay siiyaan u doodis shaqo-kiiseed oo ku salaysan qadiyada macaamiil badan oo kala duwan:

- Dadka waaweyn ee arimaha caafimaadka maskaxda
- Caruurta & dadka da'da yar
- Dadka waaweyn ee qaba curyaanimadda waxbarashadda
- Dadka waaweyn iyo caruurta/dhalinyarada jecel inay sameeyaan cabasho ku sahabsan daryeelka caafimaadka NHS
- Dadka waaweyn ee curyaamiinta ah
- Dadka dareenkoodu dhantaalan yahay
- Dadka waawayn

U doodista dhowr meelood oo kala duwan ayaa lagu bixiyaa, oo ay ka mid tahay:

- Laamo badbaadsan
- Cisbitaalo
- Adeegyo maalinle ah
- Laamaha caafimaadka maskaxda ee dadka waawayn
- Xanaanooyinka Caruurta
- Forensic Psychiatry Units Laamaha caafimaadka maskaxda
- Xanaanada caruurta
- Xabsiyadda
- Laamaha ku meel gaadhka ah
- Mashaariic bulshadda ku salaysan

Macaamiishu waxaa sidoo kale laga yaabaa inay dorotaan inay mid ka mid u doodayaashayadda kula kulmaan xafiisyadayadda ama goob ay doordeen .

Adeegyadda SEAP waxay sidoo kale siiyaanu doodis iyo xuquuq ku dhisan tabobar adeeg bixiyayaasha caafimaadka iyo adeegyada daryeelka bulshadda; waxaanay tabobaraan, taageeraan isla markaana awoodeeyaan isticmaalayaasha ku lugta leh xulida shaqaalaha hay'addahan. Icticmaalayaasha Adeegu waxay qayb ka yihiin hawsha xulista iyo barnaamijyadda shaqaalaha SEAP.